

IIB MA GALO

FAAFINTA

RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho, 30 Agoosto 1982 L. 2 r 8

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaa bmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

S H A R C I

QAYBTA

KOWAAD

W. M.

QAYBTA

LABAAD

QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 26 ee 14 Agoos. 1982, Dhisid Maxkamado Dagaal ee Ciidamada Qalabka sida.

BOG. 671

SHARCI L. 27 ee 9 Agoos. 1982, Dhismaha Guddiga Difaaca iyo Nabad gelyada ee Qaranka.

» 674

SHARCI L. 28 ee 21 Agoos. 1982, Isbiddelka laad ee Miisaaniyadda 1981.

» 677

SHARCI L. 29 ee 21 Agoos. 1982, Isbeddelka laad ee Miisaaniyadda 1982.

» 679

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 26 ee 14 Agoos. 1982, Dhisid
Maxkamado Dagaal ee Ciidamada Qa-
labka Sida.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 54aad X.H.C.C.D, ee Sharci
Lamar 1 ee 31.3.1964.

MARKUU GARTAY: Baahida loo qabo in
la dhiso Waaxyaha Maxkamadaha socda ee Ciidam
mada waqtiga Dagaalka iyadoo lagu magacaabay
Maxkamadaha Dagaalka ee Ciidammada lagana
abuurayo Deegaannada Dalka ee loo aqoonsaday
Goob Dagaal, kaddib markii Ciidammada (Xabashi
da) si isdaba Joog ah ugu soo qaadeen weerar Cir
iyo Dhulba Dalka Soomaaliya.

MARKUU TIXGELIYEY, In dhammaan Dalka Soo-
maaliyeed ee Xuduud la leh Dalka Xabashida loo
aqoonsaday Goob Dagaal oo Xabashida iyo Huwan-
teedu si is daba joog ah u soo weerarayaan.

MARKUU ARKAY: Soo Jeedinta Wasiirka Wasaarad
da Gaashaandhigga.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Laga bilaabo 1.7.1982 waxaa la dhisay Afar waax
socota ee Maxkamaddaha Ciidammada Qalabka sida ee
Dagaalka lagana magacaabay «Maxkamadaha Dagaal-
ka ee Ciidammada» oo leh awoodda la xiriirta qaadista
Dacwooyinka Dembiyada hoos yimaada waqtiga Da-
gaalka (Reati soggetti alla Giurisdizione Militare di
Gucrra), loona kala saaray qaybaha uu halganku ka
socdo.

b— Maxkamadda Dagaalka ee Ciidammada oo awood
u leh qaadista Dacwooyinka Dembiyada ka dhaca
inta u dhexeysa Aagagga Beled Weyne Dhuusa
Maroob

- j— Maxkamadda Dagaalka ee Ciidammada oo awood u leh qaadista Dacwooyinka ka dhaca Qaybta 26ad
- x— Maxkamadda Dagaalka ee Ciidammada oo awood u leh qaadista Dacwooyinka Dembiyada ka dhaca Qaybta 60aad.

Qod. 2aad.

Maxkamadda Ciidammada Xamar waxay u beddel meysaa Maxkamad Dagaal ee Ciidan, waxayna ka hawl galeysaa inta u dhexeysa Cadaado Garoowe.

Qod. 3aad.

- b— Maxkamadda Ciidammada Dh. Mareeb waxay u beddelmeysaa Maxkamad Dagaal ee Ciidan, waxayna ka hawlgaleysaa inta u dhexeysa Beled Weyne Dh. Mareeb.
- t— Maxkamadda Ciidammada ee Qeybta 26aad waxay u beddelmeysaa Maxkamad Dagaal ee Ciidan waxayna ka hawl galeysaa inta ku siman Aagagga Qeybta 26aad.
- j— Maxkamadda Ciidammada Qeybta 60aad waxay u beddelmeysaa Maxkamad Dagaal ee Ciidan, waxayna ka hawlgaleysaa inta ku siman Aagagga Qeybta 60aad.

Qod. 4aad.

Maxkamadaha Dagaalka ee Ciidammada, fulinta hawlahooda, waxay ku dhaqmayaan Xeerka habka Ciqaabta Ciidammada ee Nabadda, Xeerka habka Ciqaabta Ciidammada ee Dagaalka iyo Nidaamka Garsoorka Ciidammada ee ku salaysan Sharci Lam. 1-2 ee 31.3.64

Qod. 5aad

Waxaa la tirtiray Xeerka Tirsigiisu yahay 54 Biis

Qod. 6aad.

Go'aannada ka soo baxay Maxkamadaha Ciidamada Qalabka sida ee ka horreeyey maalinta Sharcigaan la saxiixay, sidoodii ayaa loo hirgelinayaa.

Qod. 7aad.

Xeerkan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiiga ah ee Dawladda, wuxuuna dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha.

Muqdisho, 14 Ago. 1982

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre